

Wargelin xannaanadu/iskuulku u gudbinayo guryaha

### **Isnidaamis (Scabies)**

Xannaanadayada/iskuulkayaga waxaa laga helay isnidaamis. Si looga hortago faafidda isnidaamiska waxaannu idinka codsanaynaa inaad wargelintan hoos ku qoran si fiican u akhrisataan. Haddii loo baahdana waxaad samaysaan sida la idiin sheegayo in isnidaamiska la isaga daaweeyo.

Haddii isnidaamiska laga helo dad ehelkiina ah ama xannaanada ama iskuulka, qoyskiinuna uu leeyahay astaamo ku haboon cudurka isnidaamiska, iyadoo aan dhakhtar loo tegin baa la bilaabi karaa daaweynta. Hase yeeshee mararka ay tahay, in sidan caadiga ah si ka duwan la sameeyo, waxaad ka fiiri meesha ay ku qoran tahay "Goormaa dhakhtar loo tagaa?".

### **Tilmaansiinta qofka isnidaamiska**

Isnidaamiska waxaa keena kutaan (syhyhpunkki) dhererkeedu yahay 0,4 mm. Kutaanta dheddigga ah ayaa jirka qofka qodata oo ka samaysata dalool dhererkiisu yahay 2-15 mm oo ay ukun ku dhasho. Ukunta qiyaastii 2 todobaad bay ku qaadataa, inay korto oo isu beddesho kutaan u bisin jinsi ahaan inay noqoto lab ama dheddig.

Istaabashada jirka ayaa la isugu gudbiyaa oo la isku qaadsiiyaa isnidaamiska. Gaar ahaan heerkulka sariirta ee diirran bay kutaantu qof ka soo gurguurataa oo qofka kale u soo gurguurataa. Hase yeeshee waa dhif in isnidaamiska lagu kala qaado dharka sariirta ku goglan. Carruurta markay wada dheeldheelayaan bay isnidaamiska isqaadsiin karaan.

Markay beesha kutaanta ah ee isnidaamiska keentaa badato ayaa waxaa muuqda astaamaha isnidaamiska, oo qofku wuxuu u nuglaadaa kutaanta badatay iyo dheecaamada ay soo daayaan. Astaamuhu intaanay soo ifbixin ka hor baa isnidaamiska la qaadaa. Astaanta ugu horaysaana waa qofku markuu isnidaamiska qaaday markay ka soo wareegto 3-6 todobaad ayaa waxaa qofka ku bilowda cuncun habeenkii ah oo aad u daran. Sida caadiga ah qofku wuu is xoqaa oo xoqitaanka uu isxoqay dartiis buu nabarro ku yeeshaa faraha dhexdooda, gacmaha meesha dhudhunka iyo gacanta qaybteeda hore iska galaan, laabta (naaska) iyo meelaha hoose ee taranka. Jirku cuncunka uu yeeshay waxay inta badan muujisaa, inuu qofku isnidaamis qaaday. Markaad si fiican meelaha ugu fiirsato waxaad arkaysaa in meelahaasi leeyihiin daloollo iyo finan yar yar oo biyo ku jiraan. Daloollada dhererkoodu waa 2-15 mm, ballacooduna waa 0,5 mm, waxayna si fiican uga muuqdaan faraha dhexdooda, xubnaha taranka ee ragga, carruurta yar yarna waxaa lagu arkaa calaacasha jirkeeda iyo cagaha hoose jirkooda. Mararka qaar aad bay u adag tahay in isnidaamiska la xaqiijiyo.

### **Iska daaweyn**

- Dharka sariirta, shukumaannada (tuwaallada) iyo dharka kaleba waa in muddo 20 daqiiqo ah lagu dhaqaa biyo kulul.
- Dharka aan biyaha u adkaysan karin waxaa lagu ridaa kiish bac ah, ka dibna inta kiishka bacda ah afka laga xiro baa 2 todobaad meel la dhigaa.
- Qabowga badan ee eber ka hooseeya (pakkanen) iyo kulaylkuba si aad ah bay u baabi'iyaaan kutaanta.

Isnidaamiska cuncunkiisa iyo finankiisa waxaa la iskaga daaweeyaa oo la isticimaalaa kareem ay ku jirto walaxda la yiraahdo perimetriini. Kareemka waxaa la mariyaa madaxa mooyee jirka intiisa kale oo dhan. Jirka oo qallalan oo yara qabow baa kareemka la mariyaa. 8-15 saacadood ka dib baa kareemka laga dhaqaa jirka. Haddii wakhtigaas inta lagu jiro gacmaha la iska dhaqo, waa in gacmaha haddana kareemka la mariyaa. Waa in la iska ilaaliyaa in la dhidido. 1-2 todobaad ka dib baa haddana mar labaad kareemka sidii oo kale la isu mariyaa, laakiin meelaha aan astaamaha cilladaha ah lahayn waxaa ku filan hal mar oo kareemka la mariyo.

Carruurta 2 sano ka yar iyo dadka waayeelka ah waxaa la daaweeyaa haddii dhakhtar u soo qoro oo keliya. Wakhtiga uurka la leeyahay lama isticimaalo karo kareemka Perimetriini (Perimetriinivoide). Cilladaha uu kareemku keeni karaa waa jirka oo nuglaada iyo cuncun. Si loo dejiyo jirka nuglaaday

(cilladda leh) waxaa la samayn karaa, in daryeelka kareemka Permetriini ka dib, meelaha jirka ah ee cillada leh la mariyo tusaale ahaan kareem ay ku jiraan hydrokortisoni iyo klooriheksidiini.

### **Goormaa dhakhtar loo tagaa?**

Haddii:

- ilmo yar ama qof waayeel ah lagu arko astaamaha isnidaamiska
- ay jiraan sababo keenaya in laga shakiyo inuu jiro infakshanka bakteeriyadu keento
- astaamuhu aad u daran yihiin
- isdaryeelidda iyo isdaaweyntu waxba tari waayaan

Waxaa laga soo xigtay: Apteekin itsehoito-opas ([www.itsehoito-opas.net](http://www.itsehoito-opas.net)) Aqoonsiga artikalka: pot00156 (000.336).

Waxaa qoray: Dhakhtaradda takhasuska leh (el) Leila Mikkilä 14.11.2008

Waxaa hubiyey oo aqbalay: Dhakhtaradda sare (ylilääkäri) Päivi Hirsso 17.11.2008